Seattle Department of Education & Early Learning

SPP PATHWAY

SPP SEATTLE PRESCHOOL PROGRAM

Barnaamijka Dugsiga Hoose ee Seattle Xeerarka
Lacag-bixinta Waxbarashada ee 2025-26

Siyaasadaha Lacag-bixinta Waxbarashada

1. **Lacagta waxbarashada waxay daboolaysaa kaliya barnaamijka SPP oo ah 6-saac maalintii; ma daboolayso kharashaadka daryeelka carruurta ee ka baxsan saacadaha dugsiga caadiga ah ama maalmaha jadwalka dugsiga. Fadlan eeg jadwalka tusaalaha hoos ku xusan si aad u hesho xog dheeraad ah.**
2. Lacag-bixinta SPP waxay bilaaban doontaa bisha Oktoobar; qoysaska laguma soo dallici doono khidmada SPP ee bisha Sebteembar.
3. Lacagta waxbarashada ***lama*** dhimayo sababo la xiriira maqnaanshaha caadiga ah ee ardayga ama xiritaanka caadiga ah ee hay'adda (fasaxyada, maalmaha barafka). Biilasha lacagta waxbarashada ee Juun lama yarayn doono iyadoo aan loo eegayn taariikhaha bilowga/ka bixitaanka. Xog dheeri ah oo ku saabsan qaybinta heerarka yaraynta waxaana laga heli karaa.Qaybta hagaajinta kharashka waxbaridda.
4. Biilasha lacagta waxbarashada ee bilaha ah waxaana loo diri doonaa iimaylka ugu muhiimsan ee ku kaydsan galka laga bilaabo September 2025.
5. DEEL Waxay bixisaa qiimo dhimis 10% ah walaal kasta oo laga diiwaangeliyey SPP.

Jadwalka Lacag-bixinta

Biilka bisha	Seebtembar	Aktoobar	Nofeembar	Dhiseembar	Janaayo	Febraayo	Maarso	Abriil	May	Juun
Taariikhda Dhamaadka Ka waran isbadalka	Wax Biil ah lama so dirin	10/3/25	11/03/2025	12/3/25	1/3/26	2/3/26	3/3/26	4/3/26	5/3/26	6/3/26
Biilasha Waxbarashada limeyl aya lagu soo direy	Wax Biil ah lama so dirin	10/9/25	11/12/25	12/9/25	1/9/26	2/9/26	3/9/26	4/9/26	5/11/26	6/9/26
Lacag-bixintii wa la gaaray Taariikhda	Wax Biil ah lama so dirin	10/24/25	11/27/25	12/24/25	1/24/26	2/24/26	3/24/26	4/24/26	5/26/26	6/24/26

Maareynta Lacagta waxbarashada

1. Isbeddelada dakhliga ama tirada qoyska waa in lagu soo sheego isbadalada dakhliga kooxda diiwaangelinta SPP ka hor taariikhda dhamaadka (ee kor ku xusan) si loogu daro wareega biilka bishaas. Haddii kale, dhammaan isbeddelada waxa dabakhaya taariikhda biilka bisha ee soo socda.
2. Biilasha lacagta waxbarashada ee Juun lama yarayn doono iyadoo aan loo eegayn taariikhaha bilowga/ka bixitaanka. Caruurta galaya ama ka bixiaya bartamaha bisha inta u dhaxaysa Oktoobar – May, lacagta waxbarashada waa la qaybin doonaa sida soo socota:
   - Galaya ama ka hor 15ka, ama ka baxaya ama ka dib 15ka, ma jiro isbeddel ku saabsan shuruudaha lacagta waxbarashada
   - Galaya kadib 15ka ama ka baxaya ka hor 15ka, kharashaadka biilka waxbarashada waxaa la dhimey 50% kiiba

Jadwalka Tusaalaha: Maalinta Barnaamijka Dugsiga ka hor iyo Qaabka Bixinta Lacagta

TUSAALE 7:00-9:00 subaxnimo Ka hor/intaan La Kordhin Saacadaha Daryeelka	*TUSAALE* 9:00 subaxnimo--3:00 galabnimo Saacada Iskuulka SPP	*TUSAALE* 3:00--6:00 galabniimo Kadib/ markii Saacadaha Daryeelka La Kordhiyey
Qiimaha: Heerarka waa ku kala duwan yihiin Adeeg Bixiyayaasha. Fadlan la xiriir iskuulka cunugaaga si'aad u ogaato kharashka maalinta la dheereeyey. **Qaabka Lacag-bixinta**: Lacagata waxaa la siianayaa Adeeg-bixiyaha si toos ah. Hababka caadiga ah ee bixinta waxaa ka mid ah deeqaha daryeelka carruurta iyo ka bixinta lacagta jeebkaaga.	**Kharashka** Lacagta waxbarashada ee SPP waxaa lagu go'aamiyaa miisaan dabacsan. **Qaabka Lacag-bixinta**: Lacag bixinta waxa si toos ah loo siiya Magaalada Seattle/SPP. Fadlan eeg shaxda boga 2aad si'aad u ogaato sida lacagbixinta loo gudbiyo.	**Qiimaha:** Heerarka waa ku kala duwan yihiin Adeeg Bixiyayaasha. Fadlan la xiriir iskuulka cunugaaga si'aad u ogaato kharashka maalinta la dheereeyey. **Qaabka Lacag-bixinta**: Lacagata waxaa la siianayaa Adeeg-bixiyaha si toos ah. Hababka caadiga ah ee bixinta waxaa ka mid ah deeqaha daryeelka carruurta iyo ka bixinta lacagta jeebkaaga.

Fadlan xusuusnow, kani waa jadwal tusaale ah. Saacadaha saxda ah ee shaqada ee adeeg bixiyaasha kaliga ah waa ay ku kala duwan yihiinh, mana wada bixiyaan dhamaan adeeg bixiyayaashu saacado dheeraad ah

Bixinta Lacagaha

1. Lacag-bixinta waa in lagu bixiyo jadwalka biilka ee la qoondeeyay.
2. Eeg ikhtiyaarada lacag Bixinta si'aad u ogaato sida/halka laga bixiyo lacagaha.
3. Markaad ku bixinayso lacagta telefoon ama online ahaan, waxaad u baahan tahay Aqoonsiga Macmiilkaaga iyo Faahfaahinta Biilka #.
4. Ku Qor "City of Seattle-SPP" dhamaan jeegaga iyo boonada lacagta.

Fursadaha Lacag-bixinta	Xogta Xiriirka/Cinwaanka	Nooca Lacag-bixinta
Onleynka (Habka la doorbidayo)	Portal-ka waxaa laga heli karaa halkan: Eeg Faahfaahinta Akoonka (billerpayments.com)	Waxaa loo baahan yahay lambarka macmiilka iyo lambarka biilka # Hadii biilka uu yahay**mid ka yar $3000,** labadaba kaarka deynta iyo akoonka bangiga waa la aqbalayaa. Haddii biilku ka badan yahay **$3000, kaliya akoon bangi** ayaa loo isticmaali karaa.
Boostada (Habka la doorbidayo)	Magaalada Seattle-SPP Treasury Dept Accts Receivable PO Box 94626 Seattle, WA 98124-6926	Jeeg ama Boonada Lacagta Ku Qor "City of Seattle-SPP" dhamaan jeegaga iyo boonada lacagta.
Taleefanka (Kaliya marka boga lacag-bixinta ee khadka tooska ah aan la heli karin)	Khadka Lacag-Bixinta ee Magaalada: (206) 684-7800 Saacadaha: 8:30 subaxnimo ilaa 3:00 galabnimo	Visa/Mastercard (waxaa loo baahan yahay 3da lambar ee sirta ah) Waxaad u baahan tahay Aqoonsiga Macmiilka iyo Lambarka Biilka #.
Qof Ahaan	Seattle Municipal Tower Dabaqa4aad Miiska Lacag-Bixinta/Macluumaadka ee Dabaqa Seattle Municipal Tower 700 5ka Avenue Seattle, WA 98104 Saacadaha: 8:00 subaxnimo ilaa 3:00 galabnimo	VISA/Mastercard, Lacag cadaan ah, Jeeg
	Xarumaha Adeega Macmiilkahttp://www.seattle.gov/customer-xarumaha adeega	VISA/Mastercard, Lacag cadaan ah, Jeeg

Cadaynta Lacag bixinta-Ujeedooyinka Macluumaadka Kaliya

1. Si xushmad leh, SPP waxay soo diri doontaa qoraalada taariikhda kharashka waxbarashada laba jeer sanadkii, Febraayo iyo Luulyo
2. Si'aad u hesho warbixino lacag-bixin dheeri ah, fadlan codsi ku soo dir Iimailkan:SPPbilling@seattle.gov

Nala soo xiriir

1. Iimeyl ku soo dir wixii su'aalo lacag bixinta ah: SPPbilling@seattle.gov
2. Taleefanka wixii su'aalo lacag-bixinta ah: 206-684-5660
   Saacadaha: 8:00 subaxnimo ilaa 3:00 galabnimo

Su'aalaha Badanaa La' iswaydiiyo ee Barmaanijka Dugsiga Barbaarinta ee Seattle

Goormey ayay la doonayaa lacag-bixinteyda?
Lacag-bixinta waxaa lagu saleynayaa sida ku cad Jadwalka qaansheega ee sare ama taariikhda ku qoran qaan-sheega.

Xaggee ayaan ka helaa biilasha waxbarashada bilaha ah?
Waxaad ku heli doontaa biilasha iimayl ahaan oo ka imaanaya Magaalada Seattle info@seattle.gov taariikhda la soo direy. Hadii aadan helin qaansheega (biilka), fadlan hubi galkaaga SPAM ka. Hubi inaad ku darto 'info@seattle.gov" sida Soodire Badbaado leh (ama calaamadee inaysan ahayn SPAM) si'aad u hubiso in aad heshey iimeyl.

Maxaad igu soo diraysaa (iigu soo dalaceysaa) lacagta buuxda ee bilaha Juun?
Dhamaan adeeg-bixiyaasha SPP waxay maalmo yar bixiyaan adeegyo loo baaahan yahay, markaa waxabashadu waxay u qabysantaa kharash bille ah oo sii jiraya bilkasta iyada oo aan loo eegin tirada maalmaha uu barmaaniku shaqeeyo bishii.

Maxaa dhacaaya hadii aan ka daaho ama bixin kari waayo waqtigii loogu talagalay?
Fadlan ogeysii xafiiska biilasha hadii aad la kulantay isbeddel ku yimid daruufaha dhaqaale ee qoyskaaga oo aadan awoodin inaad lacag bixiso. Mararka qaarkood, waxaa laga yaabaa inaad u qalatno dhimista kharashka waxbarashada. Sidoo kale waxaanu awoodnaa inaan dejino qorshe lacag-bixineed. Fadlan la xidhiidh SPPBilling@seattle.gov.

Ma bixisaa doorashooyin lacag-bixineed onlayn ah?
Haa, waan ku faraxsanahay inaan bixino ikhtiyaaro lacag bixinta onleynka ah. Si'aad u hesho lacag-bixinta khadka onleynka ah, waxaad u baahan doontaa qaansheegtaada iyo lambarkaaga macmiilka. Hadii aadan haysan lambaradan, fadlan la xiriir SPP adoo iimeyl ku dirayasppbilling@seattle.gov ama (206) 684-5660. Xiriirka (Portal) ayaa laga heli karaan halkan, Faahfaahinta Koontada Raadinta (billerpayments.com). Fadlan ogow in, hadaad qaansheegtu ka hooseeyso $3000, kaarka deynta iyo akoontiga bangiga labadaba waa la aqbalayaal. Hadii qaansheegtu ka badan tahay $3000, akoonti bangi oo keliya ayaa la isticmaali karaa.

Maxaad sameyaa hadii uu khalad ku jiro biilkayga waxabarashada?
Fadlan ogeysii xafiiska biilasha ee sppbilling@seattle.gov hadii uu khalad ku jiro biilkaaga. Shaqaalaha DEEL ayaa wada shaqeyn doona si'ay u go'aamiyaan in isbadel Kharashka waxbarashada ah loo baahan yahay iyo in kale.

Ma aqbasha lacag-bixino qayb ah ama ma bixisaa qorshooyin lacag-bixineed?
Waxaanu aqbalnaa dhamaan xadiga lacag bixinta waxaana bixinaa qorshooyinka lacag bixinta kiis-kiis. Fadlan kala xiriir, xafiiska biilasha ee sppbilling@seattle.govwixii macluumaad dheeeraad ah.

Maxaa dhacayaa hadii dakhligeygu isbedelo oo aan jeclaan lahaa in qadarkayga waxbarashada la dhimo?
Fadlan laxiriirpreschool@seattle.gov oo wata dukumiinti dakhli oo la cusboonaysiiyey. Khabiir ku takhasusey diiwaan gelinta ayaa kula soo xiriir doonaa. Kororka dakhliga uma baahna in la soo sheego sanad dugsiyeedka, si kastaba ha ahatee, waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad dib u xaqiijiso dakhligaa hadii aad ku noqoto SPP sanadka labaad.

Waaxda biilasha ee SPP ma saxiixi kartaa foomkayga Xisaabinta Kharashka Dabacsan (FSA)?
Maya, adeeg bixiyaha xanaanada caafimaagkaagu wuxuu u baahan doonaa inuu saxiixo foomkaaga FSA maadaama ay yihiin kuwa bixiya daryeelka oo xaqiijin kara ka qaybgalka. Waxaanu ku faraxsanahay inaanu ku siino kharashyada/lacag-bixinta oo kooban si'aad ula wadaagto adeeg bixiyahaaga si'aadd u codsato soo koobidda lacag bixinta, fadlan iimeyl u soo dir: SPPbilling@seattle.gov.

Miyaad la igu leeyahay kharashka waxbarashada xiliga xagaaga?
Haa, hadii ilmahaagu ka qaybqaao balaarinta (fidinta) xagaaga ee fasalka SPP, waxaa laguugu dalacayaa kharashyada. Isla heerka biilshada ayaa lagugu dalacaya inta lagu jiro bilooyinka xagaaga.